

Liiska Hubinta Shuruudaha Qorshaha Diyaargarowga Loo-shaqeeyaha

Loo shaqeeyayaashu waa inay samaystaan oo ay hirgeliyaan qorshe wax ka qabanaya qaybaha soo socda oo ay ku soo dhajiyaan meel fagaare ah.

Haddii shaqaaluhu ay ku shaqayn karaan guriga, waa in loo oggolaado inay guriga ku shaqeeyaan.

Hubi in shaqaalaha xanuunsan ay guriga joogaan

1. U sameeya borotokool baaritaanka caafimaadka oo loogu talagalay shaqaalaha bilowga shifti kasta, sida qaaditaanka heerkulka ama sahaminta/su'aalaha baaritaanka caafimaad.
2. Aqoonsada oo karantiila shaqaalaha qaba astaamaha COVID- 19 iyo kuwa uu soo gaaray, oo una dira guriga.
3. Samaysta habka/borotokoolka wada-xiriirka marka ay u badan tahay in shaqaalaha uu cudurku soo gaaray.
4. Samaysta habka soo sheegista shaqaalaha jirran.
5. Qiimeeya oo hagaajiya xeerarka fasaxa bukaanka si loo muujiyo baahida karantiilka iyo dhiirrigelinta shaqaalaha jirran in ay guriga joogaan.
6. Bixiya u fududaynta loogu talagalay dadka nugul.
7. Si cad ugu sheega xeerarka fasaxa jirrada dhammaan shaqaalaha.

Kordhiya kala fogaanshaha bulshada: Shaqaaluhu waa inuu midba midka kale u jiro ugu yaraan lix fiit

1. Kordhiya isticmaalka in guriga lagu shaqeeyo.
2. Kala durdurkiya shiftiyada, wakhtiyada nasashada; sameeya shiftiyo dheeraad ah.
3. Qiimeeya qaababka isu socodka si loo yareeyo in la isku ciriiriyo irridaha laga soo galo, jidadka hoolka, iwm.
4. Yareeya isu imaatinka shaqaalaha.
5. Hubiya kala fogaanshaha dadka ee goobaha shaqada dhexdooda, oo ay ku jiraan goobta shaqada, laymanka warshada, iwm.
6. Xaddida isdhexgalka shaqaalaha ee aan muhiimka ahayn - dhulka, dhismayaasha, campuska/xerada, goobaha shaqada, iwm.
7. Kordhiya masaafada u dhaxaysa shaqaalaha iyo macaamiisha, sida adeegsiga gaari ku soo maritaanka (drive-thru) ama kala xiritaanka.

Nadaafadda shaqaalaha iyo xakamaynta meesha xanuunku ka imaanayo

1. Hubiya in shaqaaluhu ay si joogto ah u dhaqaan gacmahooda. Xaqiijiya in qalabka gacma-dhaqashada iyo/ama jeermis ka dilista si diyaar ah loo heli karo.
2. Bixiya agabyaya isilaalinta ee lagu taliyey, sida maaskaro dhar ah oon ahayn kuwa caafimaadka, galoofyo, jeermis dile, qalabka isilaalinta, gaashaamo, iwm.

3. Soo dhajiya calaamadaha gacmo-dhaqashada iyo “dabool qufacaaga”.
4. Dhiirigeliya isticmaalka maaskarada lagu kontaroolayo meesha cudurku ka imaanayo, sida maaskaro maro ah oo aan kuwa caafimaadka ahayn.
5. Mamnuuca in goobta cunto lagu diyaariyo iyo in lagu wadaago.

Habka/borotokoolka nadiifinta iyo jeermis ka dilista

1. Si joogto ah u nadiifiya oo jeermiska ka dila dhamaan meelaha, sida xafiisyada, musqulaha, meelaha la wadaago, qalabka elektiroonigga ah ee la wadaago, mashiinada, qalabka, kontaroolada, iwm.
2. Ugu yaraan maalin kasta, nadiifiya dhammaan waxyaabaha - inta badan la taabto sida gacanka albaabka, gacanqabsiga, meesha nalka laga daaro, meelaha dushooda sare, iwm.
3. Xaqiijiya in la heli karo qalabka gacmaha jeermiska ka dila iyo waxyaabaha nadiifinta la ee la ansixiyay..
4. Ka buufiya/ka saara cudurka goobta shaqada haddii uu shaqaale la xanuunsado COVID-19.

Kontaroolidda macaamiisha iyo ilaalinta alaab keenista, alaab qaadashada iyo keenista

1. Macaamiishu waa inay mar hore sii dalbadaan alaabada ama mar hore inay sii qorshaystaan dayactirka ama hagaajinta alaabada ama adeega u xiiritaanka xayawaankooda ka hor inta aysan aadin ganacsiga.
2. Macaamiisha waa in aan loo ogolaanin inay soo galaan goobaha ganacsiga.
3. Wakhti u qabashada xiliyada u geynta banaanka ah, qaadista iyo u keenitaanka waa in lasii ballansado, oo waa in imaanshaha goobta u geynta, qaaditaanka iyo u keenitaanka la isugu soo sheego cod, qoraal ama fariin email ahaan.
4. Habka lacag bixinta ee aan la is soo gaaraynin waa in la isticmaalo markasta oo ay suurtagal tahay. Haddii habka lacag bixinta ee aan la isa soo gaaraynin aysan suuragal ahayn, lacagta waa in lagu bixiyo qaab u saamaxaya ugu yaraan masafo lix fiit ah in ay u dhaxayso shaqaalaha iyo macmiilka.
5. Xaqiijinta dalabka sidoo kale waa in lagu sameeyo iyada oo la adeegsanayo qaab u saamaxaya ugu yaraan masafo lix fiit ah in ay u dhaxayso shaqaalaha iyo macmiilka.
6. Shaqaalaha waa in la siiyo galoofyo haddii ay gacanta ku qabanayaan badeecado iyo/ama ay lacag ka qabanayaan macaamiisha, waana inay xirtaan daboolka wejiga ee aan ka dhakhtarka ahayn si looga hortago faafitaanka cudurka.
7. U geynta banaanka ah, qaadista iyo u keenitaanka alaabta waa in lagu sameeyaa iyadoo la adeegsanayo qaab u ogolaanaya ugu yaraan masafo lix fiit ah in ay u dhaxayso shaqaalaha iyo macmiilka.
8. Macaamiisha waa in la weydiisto inay xirtaan wax wejiga lagu daboolo.
9. Goobaha u geynta iyo qaadistu waa inay u ogolaanayaan masafo lix fiit ah in ay u dhaxayso macaamiisha lana yareeyo taabashada meelaha baabuurta dushooda.

Dhamaan shaqaalaha - maamulka iyo shaqaalaha - waa in lagu tababaraa habkan/borotokoolkan.